



Degmada Santa Clara County iyo dalka Maraykanka oo dhan waxa ka jira sharci qeexaya qaabka waalidku ay carruurtooda u edbin karaan, kaasoo ka gedisnaan kara kii wadankaaga. Dalka maraykanka qof kasta wuxuu xaq u leeyahay inann dhib la gaarsiin, la la dagaalin, qofna uusan ku gafin. Carruurta waxay leeyihiin xuquuqda in aan lagu gafin xataa waalidkood.



Waddankayaga waa caadi in ilmaha la dhirbaaxo, maxaan halkan sidaas u yeeli kari waayay?

Waa sharci darro inay waalidku ama qof weyni carruurta ku gafo. Dadka qaar dhirbaaxadu, garaacu iyo nooco kale oo ciqaab ah oo dhib keena ayay carruurtooda ku edbiyaan. Dalka Maraykanka iyo degmada Santa Clara County, waa sharci darro keeni karta dhibaato sharci, xarig, xabsi iyo kala foogeyn waaldika iyo carruurta.

Maxa dhacaya haddii aan ilmahayga ku gafo?

Talaabo sharci ah oo xarig, xabsi iyo carruurta oo laga qaado lagana kaxeeyo guriga, la geeyo meel carruurta lagu ilaaliyo, talaabooyinkaas ayaa bolisku iyo maxkamadu kaa qaadi karaan. Ku gafka carruurta waxay ka mid tahay arrimaha culus ee shaqaaqada guriga oo keeni kara in qofka geysta dib loogu celiyodalkiisii.

Maxaa loo arkaa ku gafka ilmaha?

Ku gafka ilmaha waxa loo arkaa shaqaaqada guri mid ka mid ah eeg bogga waxana ka mid ah:

- Ciqaab korkiisa loo geysto
- Far xumayn
- Dareynkiisa oo la wax yeeleeyo
- Haddii la daayaco

Aqoon yahay badan oo la shaqeeya dugsiyada, degaanka iyo degmada ayaa barnaamijkoodu rabaa in la soo sheego cidda lagu tuhmo inay ku gafyaan carruurta degmada Santa Clara County Child Protective Services.

Kaalmo nooc ee ah ayaan heli karaa sidii aan ula dhaqmi lahaa carruurta?

Waxa jira fasallo iyo kooxo kaalmo oo caawiya waalidiinta sidii ay ula dhaqmi lahayeen carruurtooda oo aysan ugu gafeen. Haddii aad xanaaqsan tahay ama dhiban tahaywaxaad u baahan tahay inaad raadsato gargaar ee ma aha inaa carruurta ka goyso.



Child Abuse Reporting

Hotline: (408) 299-2071

Luqadaha: Spanish iyo Vietnamese

Contact

P.O. Box 8021, San Jose, CA 95155

Tel: (408) 279-8228

Luqadaha: Spanish, Vietnamese iyo kuwo kale.

Adeegyada: Barnaamij xalinta nooc kast oo dhib ah 24ka saac. Waalidka dhibban khad loogu talo galay, isku dayga isdika, warar iyo tilmaan siin.

Teen-Line: (888) 247-7717

Children's Warm-Line: (408) 279-0303



City of San Jose, P.E.A.R.L.S Program

2695 Moorpark Ave., San Jose 95128

Tel: (408) 794-1222

Luqadaha: Spanish.

Adeegyada: Warar siin iyo tilmaan degaanka, degmada iyobulshada.

Family & Children Services

375 Cambridge Ave., Palo Alto, CA 94306

Tel: (650) 326-6576

adeegyada: Talo siin, warar siin iyo tilmaan.

Family and Children Services San Jose

950 West Julian Street, San Jose, CA 95126

Tel: (408) 292-9353

Luqadaha: Spanish iyo English

Adeegyada: Barnaamij haweenka ah, dhalina, iyo ka hortagga waalidka, barnaamij kuwa la garaacay.

